



# Waa maxay Canshuurta Cabitaanka Laqaso?

Laga bilaabo bisha Janaayo 1, 2018, waxaa canshuur laguso rogayaa cuntooyinka sonkorta leh ee laga bixiyo gudaha Seattle. Canshuurta Cabitaanka Sonkorta leh maaha canshuurta iibka ee tooska looga jaro macamiisha. Taas badalkeeda, canshuurta waxaa laga jarayaa dadka iibiya waxsoosaarta waxyaabaha sonkorta leh ee ay ku iibiyaan Magaalada Seattle gudaheeda. Qiimaha canshuurtu waa 1.75 santi halkii ounce ba.

Macaamiishu waxay dareemi karaan ama mabadareemi karaan kor ukac dhanka sikirka ah ee cabitaanada sonkoraysan.

**Kacanshuur bixiye ahaan, ganacsatada soosaarta cabitaanada waxay ufasaxan yihiin inay dulsaaraan ama kadhaafaan canshuurta cabitaanka sonkorta leh lagusoo rogay macaamiishooda tafaariiqleyda. Si taas lamid ah, tafaariiqleydu waxay lacagta canshuurta dulsaaran karaan macaamiisha wax kagadata.**

## Maxay magaalada Seattle canshuurtaan usoo rogtay?

Cilmi baaris ayaa muujinaysa in cabitaanada sonkorta leh ay keenaan sonkoroowga nooca 2aad, wadno xanuun iyo istarook, cayil iyo bololka ilkaha. Canshuur lasaaro cabitaanada sonkorta leh waxay hoos udhigaysaa iibsiga iyo cabista cabitaanadaas. Waxay sidoo kale kordhinaysaa qarashka kasoo xarooda canshuuraha iibka ee cabitaanada sonkorta leh si kor loogu qaado helitaanka cunto caafimaad leh iyo barnaamijyada maalgalinta yaraynta takoorka dhanka waxbarashada ee dadka madawga iyo dadka kale ee aan cadaanka ahayn ay waajahaan.

Cabitaanka sonkoraysan Canshuurta lasaaray **KUMA** jirto mid kamid ah qaybaha soosocda: cabitaanada nafaqada, biyaha dhalada, cabitaanka 100% dheecaanka miraha ah, caanaha (ayna kujiraan kuwa soy, mariiska, almond, qunbaha), cabitaanada arimaha caafimaad loo adeegsado, cuntooyinka ilmaha iyo dhalaanka, cabitaanada khamriga.



### CABITAANADA LACANSHUURAYO

Soodhada Caadiga ah  
Cabitaanada Tamarta  
iyo Isboortiga

Cabitaanada Miraha  
Biyaha Sonkorta leh

Qaxwaha iyo Shaaha  
Sonkorta leh

Sharoooyinka iyo  
dareerayaasha ee laga  
sameeyay cabitaanada  
sonkorta leh oo lagu  
gado dukaanada  
qaxwada, maqayadaha  
iyo meelaha lagu gado  
cuntooyinka fudud



# Sidee lacagta lagasoo aruursha canshuurtaan loo adeegsadaa?


Lacagta lagasoo aruursho canshuurta waxaa lagu taageeraa dhinacyada kaladuwan ee nafaqada, cuntada qiimaha jaban, waxbarashada dhalaanka, iyo barnaamijyada waxbarashada. Magaaladu waxay filaysaa in canshuurtaas lagasoo aruursho lacag dhan \$14.8 milyan sanadka 2018. Lacagta waxaa loo qarash garaynayaa qababka soosocda:



## Cunto Caafimaad leh

Waxaa lagu balaarinayaa helitaanka cuntooyin caafimaad qaba oo qiimo jaban, in labuuxsho dulduleelada dhinaca amaanka cuntada kajira, iyo kor uqaadista dookhyada cunto nafaqo leh oo caafimaad qabta.

**\$3.8 oo milyan**



## Waxbarashada Dhalaanka

Balaarinta adeegyada carruurta dhalashada illaa shan sano jirka ah iyo qoysaskooda; hoos udhigida kala qoqobnaanta bulshada, hormarka, iyo udiyaar garoowga waxbarashada iyo aqoonta.

**\$3.25 oo milyan**

## Waxbarashada

Waxaa lagu taageerayaa ardayda dugsiga sare ee galaysa kuleejka ayna kujiraan barnaamijyada 13th Year (sanadka 13aad) ee Kuleejyada Seattle; waxbarashada xagaaga; iyo barnaamijka lasocoshada wiilasha da'yarta ah, ee madawga ah.

**\$2.57 oo milyan**



## Oo loo qoondeeyay Soojeedinada Gudigga Talo Bixinta Bulshada

Gudigga Talo Bixinta Bulshada ayaa usoojeedinaaya Duqa magaalada iyo Golaha Deegaanka sida lacagahaas lagu qarash garaynaayo.

**\$2.77 oo milyan**

## Qimayn

Maalgelinta waxay taageeraysaa qiimaynta socota oo lagu samaynaayo saamaynta ay canshuurida cabitaanada sonkarta leh kuyeelatay wax soosaarka dhaqaalaha iyo caafimaadka ee bulshada.

**\$520,000**



## Arimaha maamulka iyo qarashaadka kale

Qarashaadka waxaa kamid ah kaabida qarashka fulinta nidaamka canshuur qaadista cabitaanada sonkarta leh, tababarada shaqada ee shaqaalaha ee shaqada canshuur aruurintu saamaynayso, iyo taageerada shaqaalaha ee Gudigga Talo Bixinta Arimaha Bulshada. Qarashkaan waxaa kujira \$1.2 milyan oo lagu bixinayo rakibada halka mar ah ee qalabka lagu aruurinaayo canshuurta.

**\$1.91 oo milyan**

*Waxaa lamuraajaceeyay 3/28/2018*

Wixii macluumaad dheeraad ah booqo:

<http://www.seattle.gov/sweetened-beverage-tax>